

XILLIGA DAL LA QABSIGA QAXOOTIGA SOO KOOBIDDA TILMAAN-BIXIYAHA 2018

Waa tilmaan-bixiye loogu tallogalay dadka hadda sharciga
Qaxootinimada heley iyo la talliyeyaashooda

Ceyrta

Xag ma u leeyahay inaan ceyrta
codsado? Sideen u codsadaa?

Socdaalka

Waqti intee dhan bay qax-
ootinimadeyda sharci tahay?
Qoyskeyga ma keysan karaa/
Ma safri/socdaali karaa?

Shaqaaleynta

Xagee baan ka karaa la
tallinta shaqo raadiska
ama dib-u-tababarasha?

Daryeelka caafimaadka

Takhtar ma iska
diwaangelin karaa?

Guriyeynta

Maxaa dhacaya marka aan
hoygayga nabadgelyo-
doonla ka guuro? Maxay
yihiiin fursadaha aan kala
doonan karo ee furan?

Soo koobidan waxaa lagu turjumey afafka Carabi,
Farsi, Madarin la fududeeyey iyo Soomaali. Tilmaan-
bixiyanhan oo dhameystiran (af Ingiriis) waxaa laga
soo dejisan karaa: www.belfastcity.gov.uk



Belfast
City Council

XILLIGA DAL LA QABSIGA – QAABKA SOO KOOBIDDA

Waa tilmaan-bixiye loogu tallogalay dadka hadda sharciga qaxootinimada heley iyo la latilliyeyaashooda

Waxaa soo saartey Xarruunta Sharciga ee Law Centre (NI) una sameeyey Kownsalka Magaaladda Belfast (Belfast City Council).

Unugga Wada Xiriirka Wanaagsan ee Kownsalka Magaaladda Belfast, Waaxda Adeegyada Magaaladda iyo Xaafadaha, 4-10 Linenhall Street, Belfast, BT2 8BP

www.belfastcity.gov.uk

Waxaa loo mahadcelinayaa Leish Dolan oo joogta Kownsalka Magaaladda Belfast, shaqaalaha hey'ada Extern ee Taageera Qaxootiga & Magangelyo-doonka Geediga ah iyo shaqaalaha Waaxda Beelaha (Communities).



Belfast
City Council



© Belfast City Council 2018

Qeybinta iyo Xafidaada-Xuquuqda (copyright)



Dal la qabsiga Qaxootiga oo uu faafiyey **Kownsalka Magaaladda Belfast** waxaa la siiyey leysanka lagu bixiyo Xeerka Wax ku soo Biiriinta Hal-abuurista Guud-ee Aan Ganacsiga aheyn-Xeer Lambar 4.0 ee Leysan Caalamiga ah.

Waa laguu ogol yahay in aad koobigareysato oo aad dad la wadaagto laakiin dukumentigan wax kama bedeli kartid adiga oo aan ogolaansho raadsan laguumana ogola in aad dano ganacsi u isticmaashid. Fadlan sheeg in uu Kownsalka Magaaladda Belfast yahay midda hawshan amaanteeda leh.

Afeef

Inkasta oo aad la isugu deyey habsiimada in ay macluumaadka tilmaan-bixiyantan ku qoran yihiin kuwo sax ah oo waqtiga la socda, haddana ma qaadi karo mas'uuliyadda waxa qaldama iyo wixii ka dhisho.

Tilmaan-bixintan waxa ay u kuurgaleysa adeegyada Belfast tahay halkaas oo ah halka ay degan yihiin qaxootiga ugu badan ee Waqooyiga Ayrland (Northern Ireland) jooga. Wakaaladaha dulumentiga lagu soo hadal qaadey ayaa kuu sii gudbin kara adgeegyada ku yaal halka kuugu dhow haddii loo baahdo.

Macluumaadka qaanuuniga ah ee la sheegey waa kuwo sharciga Northern Ireland (Waqooyiga Ayrland) keliyah quseeya. Waa in aan loo qaadan inuu yahay bayaan dhameystiran oo awood qaanuuni ah leh. Waxaa dhici karta in qaar ka mid wax laga bedelay wixii faafintan ka dambeeyey.

WAX TILMAAN-BIXINTAN KU SAABSAN

Kani waa **qaabka soo koobidda Tilmaan-bixiyaha Dhameystiran ee Dal La Qabsiga Qaxootiga**, kaas oo laga heli karo halka ah:

www.belfastcity.gov.uk iyo

www.lawcentreni.org

Waxaa soo koobidda ku jira:

- Muuqaalka guud ee tallaabooyinka xigga;
- Buug wax qoro oo lagula socdo waxa waxa kiiskaaga/arrintaada lagaala qabtay;
- Foom aad ku qori kartid faahfaahintaada qof ahaaneed, oo waxa ay wakaaladaha dowladda caadi ahaan u codsadaan;
- Gal wax laga arko, oo loo isticmaali karo in lagu keydsado waraaqaha muhiimka ah ee arrinta quseeya.

Soo koobidan waxaa lagu turjumey luqadaha ah: **Mandarin la fududeeyey, Carabi, Soomaali iyo Farsi.**

Qaabka dhameystiran waxaa ku jira:

- Faahfaahinta macluumaadka heer kasta oo ay qaxootiga dalka ula qabsanayaan sida macluumaadka lagacaha ceyrta iyo helitaanka;
- Macluumaad ku saabsan taageero/kaalmo maaliyadeed oo saa'id ah;
- Isbarbardhiga noocyada sharciyada kala duwan ee ay qaxootiga heli karaan;
- Kuwa lala xiriiro ee waxtarka leh.

Wax xusuusin muhiim ah: Waa sharci-daro in la tallin socdaal la dhiibo haddii uusan bixineynin qof shahaado u heysta oo garyaqaan, qareen ama wakaalad uu Xafiiska Komishinka Adeegyada Socdaalka ogolaansho siiyey.

TAHNIYAD

Waxaa lagu siiyey sharciga qaxootinimada. Tan waxa ay ku siineysaa xaquuq aad ku hesho waxyaabo tirro ah sida:

In aad shaqeyso oo lagu ogolaado ✓


Helidda kaalmada ceyrta ee sugitaanka bulshada ✓

Xaqa dib-u-mideynta qoyska qaxootiga ah ✓

Xaqa qaadashada dukumentiga safarka qaxootiga ✓

WAXA XIGA EE LA SAMEYNAYO

Hadda oo aad qaxooti tahay, waa in aad raadsato hoy aad degto iyo helitaanka dakhli ku soo gala (oo aad ka hesho shaqo ama kaalmada ceyrta ee sugitaanka bulshada). Waxaa ku horyaalan wax badan oo aad waqti yar ku sameyneyso maadaama taageerada ay ku siiso hey'adda magangelyo doonta (NASS) lagaa **28 maalmood** ka dib.

- 
1. Iska diiwaangeli hey'adda Extern (Ekistern)
 2. Soo qaado sharciga qaxootinimada & Kaarka Ogolaaanshaha Biometric Residence Permit ah
 3. Codso in Guri lagu siiyo
 4. Codso kaalmada Ceyrta (benefits) ah
 5. Furo akownt (account) bangi
 6. Ka fikir inaad dib-u-mideynta qoyska codsato
 7. Ahow mid wax ka warqaba

1. Iska diiwaangeli hey'adda Extern

Hey'adda Extern waxa ay kugu kaalmeyn kartaa guriyeynta, maaliyadda iyo adeegyo kale oo badan. Sida kuugu dhaqsiyaha badan aad karto ula hadal hey'adda Extern marka aad ogaato in sharciga qaxootiga lagu siiyey. U ma baahnid inaad sugto ilaa waraaqaha Home Office-ka ka hesho.

Extern

Teleefoonka: 028 9027 8424

Cinwaanka: 1st and 4th Floors, Norwich Union House, Fountain Street,
Belfast BT1 5EA

2. Soo qaado sharciga qaxootinimada iyo Ogolaanshaha Biometric Residence Permit

Waxaa lagu siin doonaa karaka **Biometric Residence Permit** oo qiraya sharciha qaxootinimada lagu siiyey. Dukumentigan waa mid aad muhiim u ah. Iska hubi inay faahfaahinta qof ahaaneed si fiican u diiwangashan tahay sida hingaada iyo taariikhda dhalashada. Haddii ay wax ka qaldan yihiin, dhaqsi ugu sheeg garyagaankaaga socdaalka kuu qaabilsan.

Haddii uu karaka kaa dhumo, waa inaad u soo sheegtaa booliiska **Police Service of Northern Ireland (PSNI)** iyo **Home Office**-ka.



3. Codso in guri lagu siiyo

Aad unugga adeegyada Hey'adda Hoy la'aanta ee **Housing Executive Homeless Services Unit** oo ka codso in **Qiimeeyaan Hoy La'aanta ku heysa** ayna, haddii loo baahdo, **Hoy Ku-meel-gaar ah ku dejiyaan**.

Turjumaan waa aad codsan kartaa.




Cinwaanka: The Housing Centre, 2 Adelaide Street, Belfast BT2 8PB

Teleefoonka: 0344 892 0900

4. Codso kaalmada Ceyrta ah

Aad Xafiiska Shaqooyinka & Ceyrta (**Jobs & Benefit Office**) ama wac teleefoonka ah: **0800 220 674**

- Codso lambarka ceymiska qaranka (**National Insurance Number**)



- Codso kaalmooyinka ceyrta la siiyo. Codso lacagaha **tax credits** (Takis Kiridid) in hab-nidaameedka wax ku soo dhaqsiga leh laguugu soo diyaariyo. Weydii in aad xaq u leedahay qaadashada lacagaha ceyrta oo taariikh hore laga soo bilaabo (**backdated benefits**) iyo in kale.

Turjumaan waa aad codsan kartaa.

5. Furo akownt bangi

Aad bangi oo weydiiso in aad akownt caadi (current account) ka furato.

Sii qaado kaarkaaga **Biometric Residence Permit** ah si laguu aqoonsado. Waxaa kale lagugula tallinayaa in aad sii qaado **wax kale oo wax lagu kala caddeyn karo** tusaalle ahaan warqad kaaga timid Home Office-ka, warqad kaalmooyinka ceyrta lagu siiyo ku saabsan, warqad kaaga timid Xey'adda Guriyeynta waqooyinga Ayrland ee NI Housing Executive, iwm.



Photograph © Philip Veater

6. Kaalmo doono

Kaalmo badan bay heli karaan qaxootiga ay dhibaato maaliyadeed heystaan. Sheyga muhiimka ah waa in aad kaalmo dhaqsi u raadsatid.

Marka hore la xiriir hey'adda **Extern. Timaal-bixiya dhameystiran ee Qaxootiga Dalka La Qabsanaya** waxa ku faahfaahsan taageero la helo.

7. Dib-u-mideynta qoyska

Dib-u-mideynta qoyska qaxootiga ah ayaa qaxooti badan mudnaan u leh. Garyaqaankaaga ayaa awooda in kugu **kaalmeyn codsashada fiisooyinka**.

Waxaa dhici karta in ay hey'ada Laanqeybta Cas ee Red Cross-ka kugu kaalmeyn karto waxa isku duwidda iyo wax socodsiinta. Kaalmo doono **ka hor** intaan aad wax qababqaabin.

Telefoonka: **028 9032 3055**



Photograph © Gus Moretta

8. Ahow mid wax ka warqaba

Adiga ayaa ka mas'uul ah fahamka waxyaabaha aad xaqa u leedahay iyo waajibaadyada ku saaran goorta aad Northern Ireland ku dhex nooshahay. Qaas ahaan, **hubso waxyaabaha ay hey'dda kaalmooyinka ceyrta bixisa kaaga baahan tahay** (sida in aad hey'adda ceyrta bixisa soo ogeysiiso wixii isbedel ah ee xaaladaada ku yimaada) iyo **sida loo codsado guriyen joogto ah** (haddii ay xaaladda ogonaaneyso).

Sharciga qaxootimada ee aad heysato gudaha dalka Biriitaaniya (the United Kingdom) ayuu ku eg. Haddii aad rabtid inaad UK ka baxdo, waxa aad u baahaneysaa in aad codsato dukumenti aad ku safarto. Waxaa dhici karta inaad u baahato fiisa aad wadanka aad booqaneyso ku gasho: tan iska hubi inta aadan socdaalin ka hore. Tan waxaa kale oo ay ku quseysaa marka aad Jamhuuriyadda Ireland booqaneyso.

Sharcigaaga qaxootinimada waxa uu ku eg yahay **muddo xadidan** (caadiyan 5 sano). Aad bay muhiim u tahay inaad sharcigaa ku cusbooneysiisato inta uusan kaa dhicin waqti ka horeeya.

Waa ay dhici karta in aad mustaqbalka xaq u yeelato codsashada wadaniyadda Biriitaaniga ah. Wadaniyada ma aha wax xaq loo leeyahay oo la iska helo oo waa inaad buuxiso shuruudaha lagaa rabo oo ay ka mid yihiin in aad af Ingiriiska ku hadli kartid iyo inaad tahay qof 'dabci wanaagsan' sida inaad tahay qof fal denbiyeedyo falin oo ka nadiif ah.

Waxaa jira illo badan oo macluumaad iyo mashaariic hanuuninta qaabilsan oo aad heli karto kuguna kaalmeynaya fahamka waxyaabaha aad xaqa u leedahay iyo waajibaadyada ku saan.

MACLUUMAADKA QOF AHAANEED

Marar badan bay wakaaladaha iyo hey'adaha kala duwan ku weydiin doonaa keenista macluumaadka ku saabsan qofka aad tahay. Waxaa dhici karta in ay ku kaalmeeyso haddii aad foomkan buuxiso, oo ay ku jiraan macluumaad badan oo aad bixintooda u baahan tahay.

FAAHFAAHINTA QOF AHAANEED	
Magaca awoowe/dambe	Magaca (magacyada) hore
Taariikhda dhalashada	Wadaniyada (Nationality)
Taariikhda imaanshaha UK	Taariikhda loo ogolaadey in uu UK joogo
Nooca ogolaanshaha la siiyey (Sharci qaxooti, Badbaadin Aadami, U Ixsaan-fal Joogitaanka Loogu Ogolaadey)	
Kaarka Biometric Residence Permit oo lambar summadeed wata	
Tariikhda uu dhacayo kaarda Biometric Residence Permit?	
Ma heystaa baasaboortan qaran?	Haa / maya
Haddii ay haa tahay, wadanka bixiyey iyo lambar summadeedka	
Ma heystaa Dukumenti Safar oo ay UK bixisey?	Haa / maya
Haddii ay haa tahay, lambar summadeedka	
Ma heystaa shahaadada dhalashada?	Haa / maya
Haddii ay haa tahay, lambar summadeedka	
Lambarka Ceymiska Qaranka (National Insurance Number)	
Dad ku tiirsan (Dependants)	Haa / maya Fadlan faahfaahintooda bogan iyo kan ku xiga ku qor
Turjumaan ma loo baahan yahay?	Haa /maya
Luqadda turjumaanka loo baahan yahay	
Lambarka teleefoonkaaga	Cinwaankaaga
Cinwaanadaadii hore iyo taariikhaha (aad deganeyd)	
DAD KU TIIRSAN	
LAMAANAHA/KAN LA ISQABO	
Magaca awoowe/hore ee Lamaanaha/ kan la isqabo	
Magaca (magacyada) hore lamaanaha/kan la isqabo	
Taariikhda dhalashada	
Wadaniyada	
Taariikhda imaanshaha UK	
Kaarka Biometric Residence Permit oo lambar summadeed wata	
Dukumenti kale oo lagu aqoonsado (tusaale ahaan baasaboortan qaran, shahaado dhalasho) iyo lambaro summadeedyo ku haboon	

CARRUURTA	Ilmaha 1	Ilmaha 2
Magac		
Taariikhda dhalashada		
Wadaniyada		
Taariikhda imaanshaha UK		
Kaarka Biometric residence oo lambar sum-madeed wata		
Dukumenti kale oo lagu aqoonsado (tusaale ahaan baasaboar qaran, shahaado dhalasho) iyo lambaro summadeedyo ku haboon		
	Ilmaha 3	Ilmaha 4
Magac		
Taariikhda dhalashada		
Wadaniyada		
Taariikhda imaanshaha UK		
Kaarka Biometric residence oo lambar sum-madeed wata		
Dukumenti kale oo lagu aqoonsado (tusaale ahaan baasaboar qaran, shahaado dhalasho) iyo lambaro summadeedyo ku haboon		
	Ilmaha 5	Ilmaha 6
Magac		
Taariikhda dhalashada		
Wadaniyada		
Taariikhda imaanshaha UK		
Kaarka Biometric residence oo lambar sum-madeed wata		
Dukumenti kale oo lagu aqoonsado (tusaale ahaan baasaboar qaran, shahaado dhalasho) iyo lambaro summadeedyo ku haboon		
MACLUUMAAD KALE OO WAXTAR LEH		
Magaca takhtarka GP-ga iyo faahfaahinta lagala xiriiro		
Magaca (magacyada) iskuulka (iskuulada) iyo faahfaahinta lagala xiriiro		
Magaca qofka wakiilka qaanuunka u ah iyo faahfaahinta lagala xiriiro		

Boggan waa in la footikoobi-gareeyo ka hor inta aan macluumaad lagu qorin, si mar kale loo isticmaalo.

BUUGGA LAGU QORO WAXYAABAHA LA QABTEY

Diiwaangelinta macluumaad ku saabsan tallaabooyinka la qaadey iyo tallo-bixino la xiriira wax-qabad dheeraad ah oo kaalmeyn kara dedejinta hab-nidaameed lagu garto meelaha wax ka banana yihiin.

TAARIKH	MAGAC IYO HEY'ADDA	TALLAABOYIKA LA QAADEY	TALLO-BIXINADA

Boggan waa in la footikoobi-gareeyo ka hor inta aan macluumaad lagu qorin, si mar kale loo isticmaalo.

XILLIGA DAL LA QABSIGA – QAABKA SOO KOOBIDDA

Waa tilmaan-bixiye loogu tallogalay dadka hadda sharciga qaxootinimada heley iyo la latilliyeyaashooda



Photograph © Alan Keenan

Waxaa soo saarey Xarruunta Sharciga ee Law Centre (NI) una sameeyey Kownsalka Magaaladda Belfasta (Belfast City Council)



Belfast
City Council



Law Centre (NI)